


App-ka MySPPS

App-ka cusub ee MySPPS kala soco waxyaabaha ku soo kordho Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul. Waaxaad app-ka ka raacan kartaa akhbaaraadka ku saabsan iskuulka uu ilmahaada dhigto, basaska iskuullada, jadwalka ciyaaraha sportiga iyo waxyaaba kale. App-ka cusub ee "MySPPS" ka dhex-raadi kana soo rogo Google Play ama Apple App Store-ka.



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan app-ka iskuullada ka eeg barta spps.org/MySPPS

App-ka MySPPS waxyaabaha uu leeyahay waxaa ka mid ah:



Newsfeed

Warar Cusub Iyo Akhbaaraad

Waxad app-ka ka helaysaa wararka cusub, qaylodhaanno iyo walibo waxyaabaha ay iskuullada ku soo qoraan bogagooda warbaahinta bulshada (facebook, twitter iwm.)



Schools | Locations

Macluumaadka Sida Cinwaannada Iskuullada Iyo Khariiradaha (Maps)

Ma doonaysaa in aad booqatid iskuulka uu cunugaaga dhigto? Hadabo waxaad app-ka cusub ka heli kartaa cinwaanka, barta internetka iyo walibo telefoonnada iyo email-lada macalimiinta iskuulka.



Infinite Campus Parent Portal

Akhbaaraad Ku Saabsan Fasalka Iyo Natiijooyinka Cunugaaga*

Waxaad la socon kartaa wakhtiga cunugaaga laga rabo in uu gudbiyo shaqada iskuulka, saamiga dhigashada iskuulka iyo natiijooyinka imtixaanaadka ee cunugaaga. Waxaad u baahan doontaa in aad soo rogatid app-ka Infinite Campus oo lacag la'aanta ah. Marka aad app-kaasi soo roganaysid waa in aad isticmaashid ID-ga degmada ee: LTGHQW.



MySPPS Menus

Menu-ga Quraacda Iyo Qadada

Waxaad app-ka ka raacan kartaa noocyada cunnada kala duwan ee ay ardayda ku quraacanayaan ama ay ku qadaynayaan.



PayPams

Lacagta Qadada Ee Cunugaaga Baaqiga U Ah*

Waxaad app-ka ka fiirin kartaa lacagta baaqiga u ah cunugaaga waxaad sidoo kale app-ka u adeegsan kartaa bixinta lacagaha cunnada.



Sports

Jadwalka Ciyaaraha

Waxaad app-ka ka ogaan kartaa natiijada ciyaaraha, jadwalka iyo walibo cayaaraha la joojiyay.



MySPPS Bus

Macluumaadka Ku Saabsan Basaska Iskuullada*

Waxaad app-ka ka ogaan kartaa in ay shirkadda basaska nagu soo wargalisay in baska uu cunugaaga saaran yahay soo dhib-dhacayo iyo in kale.



Calendar

Jadwalka Maalmaha Iskuulka (Calendars)

App-ka waxaad ka raacan kartaa jadwalka maalmaha iskuulka si aad markaasi qorshahaaga oogu sii beegtid maalmaha uu iskuulka jirin.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan app-ka iskuullada ka eeg barta spps.org/MySPPS


* Waxaa laga yaabaa in aad u baahatid app kale oo aad lacag la'aan ooga soo rogan kartid app store-ka.

Qaabka Soo-rogashada app-ka MySPPS:

1




2




App-ka MySPPS ka soo rogo Google Play ama Apple App Store. Waxaad sidoo kale app-ka ka soo rogan kartaa barta internetka ee iskuulka. App store-ka ka dhex raadi app-ka “MySPPS”.

Fur app-ka “MySPPS” ka dibna liiska iskuullada ka dooro magaca iskuulka aad rabtid.

3



4



Settings

Tag qeybta “Settings” kadibna dooro qeybta iskuullada laga xusho ee “Follow schools.”

Dooro iskuulka aad rabtid ka dibna xulo qeybaha muhiimka kuu ah sida.

- Ogaysiyo (Notifications): Hadii aad rabtid in fariimo lagu soo diro inbox-ka telefoonkaaga.
- Wararka (News): Si aad u heshid waxyaabaha ay iskuullada ku soo daabacaan bogagooda warbaahinta bulshada (facebook, twitter iwm.) iyo baraha internetka.
- Maqal iyo Muuqaal (Media) – Si aagd u heshid sawirro iyo video
- Kalandaariyaha (Calendar) – Si aad u heshid isbedelka jadwalka maalmaha iskuulka

Iminka way kuu idlaatay soo-rogashada app-ka cusub ee MySPPS. Adeegsi wacan!